

KOLBA HEER

Gabaygan waxaa tiriyey abwaankii caanka ahaa ee Cige la odhan jirey. Cige alla ha u naxariistee wuxuu ku dhashay Gobolka Togdheer.

Abwaanku wuxuu gabaygiis inagu tusaya heerarka ka duwan ee uu qofku marka uu calool galo illaa iyo cirroolannimo soo gaaro oo ay riddo.

Markii hore candhuuf baan ahaa caano oo kale.

Markii xigay casaan dhiig ah oo cad iyo jiidha yeeshay.

Markii xigay calooshii haween baan carcaraayey.

Markii xigay caweys baan dhashoo Cige lay bixiyey.

Markii xigay culays hooyaday cududahaan daashey.

Markii xigay cayaar baan tagoo cayn walba u booday.

Markii xigay cuudkaan cishoo caawiye ahaaday.

Markii xigay Cawaa lay dhisoo cawda kula loolay.

Markii xigay caruur dhawrah baa culuq naloo siiyey

Markii xigay caqlaa ii kordhoo Eebbe ka cabsooday.

Imminkana cirraan yeeshay oo coomir baan ahaye.

Allahayow cadaabta iga hay caadil baad tahaye.

Layli:

1. Labada beyd ee hore waxaa ku jira dhiig iyo candhuuf . Ka hadal sababta uu labadaasi sifo u qaatay. Goormaase labadaas heer koritaanku dhacaan?
2. Calooshii haween baan carcaraayey. Erayga **carcar** muxuu heerka koritaanka gabayaagu kaaga muujiyey?
3. Sheeg baydka inay Cige hooyadi xambaartay kuu shaagaya?
4. Sheeg baydka in Cige hawlkar ahaa muujinaya?

Curis:

Adiga oo gabaygan adeegsanaya wax ka qor heerka koritaanka dadku soo maro.



Foto: Pixel-Shot/ AdobeStoc